Waxaan Aad U Jecelnahay Inaan Dadka Kaalmeyno.

Barnaamijka ku xad gudubka haweenka wuxuu ka mid yahay barnaamijyada ay bixiso Hay'adda Adeegga Qoyska ee Toronto- hayad hormuud ah, ahna hay'ad samalfal ee bulshada u adeegto, kaalmeysana in ka badan 20,000 oo qof-qof iyo qoysas sanad kasta. Waxaan aaminsan nahay in haddii aan xoojinno awoodda qof ahaaneed ama midda qoysba, inaan dhisi karno bulsho caafimaad qabta ee qof walba ka mid yahay. Waxaanu bulshada u fidinaa barnaamijyo leh taakuleyn kala duwan iyo la talinba kuwaas oo loogu talagalay dadka dhibaateysan sidii ay uga gudbi lahaayeen dhibaatooyinka sida isla-hadalka ama walwalka, waxyeeleynta jir dilka; arrimaha khuseeyo hab galmeedkooda, dhibaatooyinka guurka; dhibaatoyinka la xiriira korsiimo-la'aanta iyo dhibaatooyinka u la yimaado gabowgu.

Sidee noo soo gaari kartaa

Si aad uga ogaatid xog dheeraad ah ee la xiriira barnaamijka ku xad gudubka haweenka, ama si aad ballan u sameysatid, fadlan so wac **416-595-9618**. Adeeggayaga waxa isticmaali kara qof kasta oo ku nool ama ka shaqeeya Toronto, iyadoo loo eegeynin jinsiyadda, cidda u kasoo jeedo, halka u ka yimid, midabka, asalka, waddaniyadda, diinta, lab ama dheddig, hab galmeedka, da'da, dadka wax u dhimman yihiin, heerka qoridda ama akhriska, xaaladda guurka ama qoysnimo, dakhliga ama ku xirnaanta xisbiyada siyaasadda. Qiimaha lacagta adeegga waxay ku saleysan tahay dakhliga iyo tirada xubnaha qoyska.

FAMILY SERVICE ASSOCIATION OF TORONTO

For People. For Change.

Haddii aad u baahantahay xog dheeraad ah ee ku saabsan barnaamijyada kale ee Hay'adda Adeegga Qoyska ee Toronto, fadlan soo wac **416-595-9618**.
Haddii aad u baahatid xafiiskeena dhexe ee maamulka, la soo xariir: 355 Church Street,
Toronto, Ontario M5B 1Z8

Tel: 416-595-9230 Fax:416-595-0242
Fiiri shabakadeena oo laga helo **www.fsatoronto.com**

Hay'adda FSA waxay soo dhaweysaa kala duwanaanta waxayna hirgelisaa siyaasad ku dhisan in aan leys cadaadinin.

United Way of Greater Toronto

Waxay xubin ka tahay Hay'adda United Way

FAMILY SERVICE ASSOCIATION OF TORONTO

For People. For Change.

Haddii aad ku jirto xiriir lagugu xadgudbo - Waan kaa caawin karnaa.

Barnaamijka ku Xadgudubka
HAWEENKA

Barnaamijka ku Xadgudubka HAWEENKA

"Markii aan halkan u soo guurnay, oo aan ka soo fogaanay ehelo iyo saaxiibaba, ninkeygu iima ogolaanin in aan isku soo qoro fasalka barashada afka Ingiriisiga, ama in aan isticmaalo gadiidka dadweynaha. Anigoo magaalo cusub jooga ayaan haddana kusii dareemay cidlo gurigeyga dhexdiisa. Carruurteyda daraadood ayey ahayd sababta keliya ee aan u rajo beeli waayey."

Arrintu Keligaa Kuma Haysato

In kasta oo ay adagtahay in la fahmo sababta, mararka qaar dadka xiriirka aan la leenahay waa ay na waxyeeleeyaan. Waxaa laga yaabaa in qofka aan la noolnahay uu ereyo xun na yiraahdo, dadka kale hortoodanaa u na liido, amaba uu isku dayo inuu jir dil nagu sameeyo. In kasta oo inteena badan aan dareensan nahay in qofka aynu la noolnahay uusan ula jeedin inuu waxyeello noo geysto, haddana, waxaan kaloon ognahay inay lagamaarmaan tahay inay dhibaatadu joogsato. Hay'adda Adeegga Qoyska ee Toronto waxay taariikh dheer ku leedahay kaalmeyta haweenka uu ku xadgudbo qofka u xiriirku ka dhexeeyo, sidii ay ku heli lahaayeen taagyeero ay ku badbaadaan kuna xoogeystaan.

Waan Ku Kaalmeyn Karnaa

Sanad kasta waxaan taagyeero qarsoodi ah u fidinaa in ka badan 1000 haween oo kaalmo soo doontay. Haddi aad ka soo qeyb gashid barnaamijkeena waa lagu dhageeysan, waxaanad baraneysaa:

- In aadan keli ahayn iyo in ay jiraan siyaabo kale oo kuu furan.
- waa maxay waxyeleyntu maxays u dhacdaa;
- in aad xoojisid awooddaada iyo in aad kor u qaadid niyadaada;
- in aad qorshe u sameysatid mustaqbalka aadna baratid xirfado cusub ee aad ku maareynsid noloshaada
- in aad nabadgelyo heshid
- in aad soo nooleyso maareynta iyo rajada noloshaada

Sida Adeeggayagu Kuu Kaalmeyn Karo

Waxaanu bixinaa taakuleyn, xog warran ku saabsan adeegyada laga helo beesha dhexdeeda, iyo la talin sidi aad ku badbaadi laheyd, annaga oo isticmaaleyna telefoonka amaba aad si toos ah noogu timaadid. Haddi aad go'aansatid inaad balan dhigatid, shaqaalaheena tababbaran ayaa kaa taakuleyn doona, sidii aad u heli lahayd siyaabaha ugu habboon ee kuu furan, si aad go'aan u gaari laheyd, aadna xal ugu heli lahayd xaaladdaahaagaa. Ka sakow la talinta fool-ka-foolka ah, haween badan yaa ka qaybgala aqoon-isweydaarsiyada taakuleynta kooxda; dhowrista caafimmadka iyo aqoon kororsiga kooxaha.

Adeegyada aan bixinno waxay ku baxaan luuqado kala, waxaana ka faaideysan kara haween ka kala socda dhaqamo kala geddisan, ama u baahan taakuleyn gaar ahaaneed, kuna nool ama ka shaqeeya magaalada Toronto. Qiimaha lacageed ee adeegga ee aan dadka ka qaadno waxay ku xiran tahay dakhliga qofka, waxaase jirta in cidna aan marnaba laga horjoogsan helidda adeegga sabab awood bixin lacag darteeed.

Si aannu u xaqiijinno baahida beesha aannu u adeegno, waxaan aasaasnay guddi la-talin ee ka koban haweenka beesha si aan taagyeero iyo taakuleynba ugu helno hadafka iyo ujeeddooyinka barnaamijka. Dhamaan haweenka ka tirsan guddiga la-talinta waa kuwo iyaga laf-ahaantoodu waayo aragnimo u leh dhibaatada waxyeeleynta.

Sida Aan Saameyn Ugu Yeelanay Nolosha Haweenka

"La talinta fool-ka-foolka ah waxay iga kaalmeysay inaan dib u dareemo qiimahayga dadnimo, isku-kalsoonideydiina iisoo noqoto, waxay kaloo oo ay iga kaalmeysay sidii aan noloshayda ugu jihayn lahaa jidka toosan. Waxaan awooday inaan xakameeyo caradii, iyo niyad jabkii maadaama aan joogo meel aan taakuleyn iyo taagyeero ku haysto."

"Barnaamijkan wuxuu ii noqday jid-nololeed, aniga oo ku sugnaa xalaad ay nafteydu khatar ku jirtay ee aan is lahaa awood aad maalin kale aad ku gartid ma lihid. Kaalmada FSAda la'aanteed waxaa laga yabaa in aanan maanta idin horjoogeen oo aan ka sheekeeyo taariikhdeydeyda."